



**SHIRKA CAADIGA AH EE GUDIDA DUGSIGA BOSTON
GUDIDA GAARKA AH EE QAADISTA IMTIXAANADA DUGSIYADA**

Arbaca, Bisha Maarij 10, 2021

Gudida Gaarka ah ee Qaadista Imtixaanada Galitaanka Dugsiyada ee kulumada onlaaynka ah ee Guddiga Dugsiga Boston wuxuu qabsomi doonaa Maarij 10, 2021 markay saacadu tahay 5 p.m. ee Zoom-ka. Si aad macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan alaabada hoosta ku liistaysan u hesho, booqo <https://www.bostonpublicschools.org/esataskforce>, iimaylka feedback@bostonpublicschools.org ama wac telefoonka Xafiiska Gudida Dugsiga Boston (617) 635-9014.

JOOGITAANKA

Xubnaha Gudida Gaarka ah Kulanka Onlaaynka ah ee jooga Galitaanada Imtixaanka Dugsiyada: Gudoomiye Michael Contompasis; Gudoomiye Tanisha Sullivan; Samuel Acevedo; Acacia Aguirre; Matt Cregor; Tanya Freeman-Wisdom; Katherine Grassa; Zena Lum; Zoe Nagasawa; Rachel Skerritt; Rosann Tung; iyo Tamara Waite.

Xubnaha Gudida Gaarka ah Kulanka Onlaaynka ah ee ka maqan Galitaanada Imtixaanka Dugsiyada: Midna.

Shaqaalaha Jooga ee BPS: Monica Roberts, Madaxa Ardayda, Horumarka Qoyska iyo Bulshada; iyo Monica Hogan, Agaasimaha Sare ee xafiiska Macluumaadka iyo Isla xisaabtanka.

DHOKUMANTIYADA LASOO JEEDIYAY

[Ajandaha](#)

Nuqulka Waxyaabaha kasoo baxay kulanka: Salaasa, Bisha Labaad 23, 2021

WAC SI AAD U DALBATO

Mr. Contompasis ayaa soo wacay kulanka si uu u dalbado. Wuxuu ku dhawaaqay in adeegyo tarjumaad isku mar ah lagu heli karo Isbaanish, Haitian Creole, Cabo Verdean, Vietnamese, Cantonese, Mandarin, Portuguese, Somali, Arabic, iyo Luuqada Dhagoolayaasha ee Maraykanka (ASL); tarjumaanada ayaa isbaray waxayna ku bixiyeen tilmaamo afkooda hooyo sida loo helo turjumaad isku mar ah iyadoo badalaya kanaalka Zoom.

Ms. Parvex ayaa waxa loogu yeedha codayn. Dhamaan xubnuhu way joogeen.

Mr. Contompasis ayaa waydiistay xubnuhu kuwaasoo ka maqnaa kulankii February 23, 2021 si ay isku barto nafahooda dadwaynaha.

Kulanka Gudida Gaarka ee Galitaanada Imtixaanka Dugsiyada Onlaaynka ah

Zoom-ka

Arbaca, Bisha Maarj 10, 2021

- Dr. Tanya Freeman-Wisdom, Madaxa Iskuulka, John D. O'Bryant Dugsiga Sayniska iyo Xisaabta
- Samuel Acevedo, Agaasimaha Fulinta ee Xarunta Kheyraadka Tacliinta Sare ee Boston, Fursada Gudoomiyaha Guddiga Dugsiga Boston iyo Shaqaalaha Gaadhista Hadafyada, iyo shaqaalaha Congregación León de Judá
- Acacia Aguirra, waalid, John D. O'Bryant Dugsiga Xisaabta iyo Sayniska, iyo macalinka BPS
- Tamara Waite, Waalidka laba arday oo BPS, iyo kabka xafiiska shaqaalaha ee Magaalada Boston

ANSIXINTA WAXYAABAHA KASOO BAXAY KULANKA: Salaasa, Bisha Labaad 23, 2021

La ansixiyay – Gudida Gaarka ah waxay ansixiyeen waxyaabaha kasoo baxay shirki February 23, 2021 Kulanka Gudida Gaarka ah ee Imtixaanka Dugsiyada.

NUQULKA FAAQIDAADA

Mr. Contompasis wuxu yidhi ardayda BPS ee Danyael Morales uu iska casilay Golihisii La-Talinta Ardayda Boston (BSAC) iyo Gudida gaarka ah ee Galitaanka Imtixaannada Dugsiyada. Degmadu waxay la shaqeyn doontaa BSAC si loo aqoonsado arday kale oo matalaya kana mid noqonaya Gudida Gaarka ah.

Mr. Contompasis ayaa waydiiyay Ms. Sullivan inay siiso waxyaabaha kasoo cusboonaaday Isbahaysiga Waalidiinta Boston ee loogu talagalay *Academic Excellence Corp. v. Gudida Dugsiga ee Magaalada Boston, et al.* Ms. Sullivan waxaa lagu sharaxay inay jirto dacwad heer federaal ah oo loo gudbiyay maxkamada oo looga soo horjeedo nidaamka galitaanka SY21-22 ee ay ansixiyeen Gudiga Dugsiyada Boston. Dhageysi onlaayn ah ayaa loo qabtay usbuuca soo socda markaas oo garsooraha uu go'aan ka gaadhi doono in la sameeyo baadhis maxkamad iyo inkale. Waxay ku dhiirigalisaa dadka inay joogaan dhagaysiga onlaaynka ah, kuwaasoo u furan dadwaynaha. Waxay sheegtay inay rabto inay u sheegto bulshada, waalidiinta, iyo ardayda inay ogaadaan in kasta oo dacwada ay jirto, nidaamka galista ayaa wali horay usocota sanadkan, sikastaba ha ahaatee casumaadaha looma diro ilaa kadib badhtamaha bisha Abriil. Waxay ku soo gabagabeysay in kooxda Gudida Gaarka ah shaqadeedu ay sii socon doonto maadaama ay ku soo ogeen Guddiga Dugsiga inay soo jeediyaan talooyin ku saabsan habka gelitaanka ee joogtada ah. Mr. Contompasis wuxuu ku daray dhagaysiga maxkamada si ay u saxeeaan una dhagaystaan dhagaysiga maxkamada.

Mr. Acevedo oo la weydiiyay su'aalaha kooban ee bulshada amicus cadaymaha laga xareeyay iyagoo taageeraya go'aanka Guddiga Dugsiyada Boston. Ms. Sullivan cadeeyay in aan laheyn qoraallo cadaymo amici ah laakiin ay jiraan hadalo fagaara ah oo ay soo jeediyeen ururo kaladuwan oo taageeraya BPS.

Mr. Contompasis waxay dib u eegeen jadwalka kulanka Gudida Gaarka ah ee sanadkan. Wuxuu xasuusiyay dadweynihii kalfadhiga dhegeysiga onlaaynka ah ee loo qorsheeyay 13-ka Maarso saacadda 10.00 ee Zoom-ka. Wuxuu ku dhawaaqay kulanka qabsoomi doona Maarj 16keeda, Sean Corcoran, Borofoseer ku xeel dheer siyaasada iyo waxbarashada ee Jaamacada Vanderbilt, Wuxuu bixin doonaa soo jeedinta nidaamka galitaanka ee Chicago. Guddoomiyaasha waxay filayaan inay ka maqlaan degmooyin kale oo si guul leh u hirgeliyey geeddi-socodka nidaamka gelitaanka taas oo laga yaabo inay faa'iido u leedahay Gudida Gaarka ah.

FAALOOYINKA GUUD EE DADWAYNAHA

- Louis Lui, arday, Josiah Quincy Dugsiga Sare oo degana Dorchester, ayaa la tijaabiyay khibradiisa waxbarasho si uu u galo Dugsiga Imtixaanka.
- Alan Tian, oo degan West Roxbury oo heerka 5aad heerka waalidka ah, ayaa lagu tijaabiyay

iyadoo ku caksi ah koodhka zip iyo ansixinta imtixaanka KHARIIRADA.

- Rachel Miselman, xubin, Isbahaysiga Waalidiinta Boston ee Kor uqaadida Tacliinta, iyo ardaydii dhamaysatay imtixaanka dugsiya, ayaa ka markhaati furay tayada waxbarashada ee dhammaan dugsiyada BPS.
- Tom Song, oo degan Roxbury, ayaa cadeeyay ansixinta imtixaanka KHARIIRADA..
- Eric Shi, oo degan West Roxbury oo waalidka ah, ayaa lagu tijaabiyay iyadoo ku caksi ah koodhka zip iyo ansixinta imtixaanka KHARIIRADA.
- Emma Yang, oo ah waalid degan Dorchester, ayaa lagu tijaabiyay iyadoo ku caksi ah koodhka zip.
- Lauren Thompson ayaa tijaabiyay tayada waxbarashada ee dhamaan iskuulada BPS isla markaana taageeray isbedelada ku meel gaadhka ah ee SY21-22.

FAALOYINKA SOO XIDHISTA

Sida uu diyaariyay guddoomiyuhu soo xidhitaanka shirka, Ms. Sullivan wuxuu muujiyay sida ay muhiim u tahay xubnaha Gudida Gaarka ahi inay dhagaystaan fikradaha, soo jeedimaha, iyo talabixinta kaga imanaysa dadka degan Magaalada Boston ka hor inta aanay bilaabmin shaqadu.

Ms. Sullivan wuxuu martiqaaday xubnaha si ay u siiyaan faalooyinki ugu dambeeyay ama su'aalo. Mr. Cregor wuxuu u mahadnaqaa kuwii tijaabiyay iyo turjumayaashii. Ms. Skerrit waxay aqoonsaday labada koox ardayda Latin-ka ah ee Dugsiya Boston ee bixiya wax dhigis bilaash ah, kuwaas oo uu xusay ardayga ka socda Dugsiya Quincy.

Ms. Grassa waxay xustay imtixaan dugsi sare oo ku yaal Grand Rapids, Michigan oo beddelay siyaasaddeeda gelitaanka iyo kala duwidda ardaydooda, taas oo xiise yeelan lahayd in la eego. Ms. Tung waxay xustay laba dhokumenti oo ku saabsan aqbalida iskuulada sare, mid ka mid ah magaalada New York iyo midka kale ee San Francisco, oo xiise u yeelan lahaa in la daawado.

DIB U DHIGISTA SHIRKA

Qiyaastii markay ahayd 6:10 fiidnimo, Guddidu waxay u codeeyeen si aqlabiyad ah, oo ku saabsan wicitaan codayn, in dib loo dhigo kulanka.

Ogaysiis:



Lena Parvex
Kaaliyaha Maamulka